

# Orientation to Ontario

## DHAQANKA IYO RUUXIYADA

### MA OTAHAY?

In Ontario yahay gobalka ugu dhaqannada badan Canada. Nus kamid ah dadka ku cusub Canada ayaa daga Ontario. In ka badan 100 luuqadood ayaa looga hadlaan halkaan.

Waxaa jira qaabab badan oo looga faa'iideyso isku dhafnaanta bulshada looguna dabaaldego dhaqankaaga gaarka ah.

### SAXAAFADA

Shabakada Warbaahinta Canada (CBC) ayaa ah warbaahinta qaranka ee dawladu maalgeliso. CBC waxay baahisaa warbixinnada maxaliga ah iyo kuwa qaranka iyo barnaamijyada dhaqanka ee laga siidaayo TV ga, raadiyaha iyo oonlaynka. Xog badan ka ogoow barta [cbc.ca](http://cbc.ca)

Waxaa jira tiro badan oo wargeysyada dhaqannada kaladuwan ah oo kasoo baxa Canada. Gudiga Warbaahinta Qaran ee Qoomiyadaha iyo Saxaafada ayaa baxsha liiska daabacadaha oo aad ka helayso webseedkooda [nationaletnicpress.com](http://nationaletnicpress.com)

Qaar badan oo kamid ah taleefishinnada iyo raadiyaasha ayaa lagu baahiyaa luuqado badan. OMNI TV waa shabad dhaqanno badan oo bixisa barnaamijyo ku baxa luuqadaha Mandarin, Cantonese, Talyaaniga, Punjabi iyo luuqadaha kale ee Koonfur Eeshiya. Si aad u hesho xog dheeraad ah, booqo [omnitv.ca](http://omnitv.ca)

### CUNTADA

Waxaa jira suuqyada iyo dukaannada waawayn ee qoomiyadaha oo iibiya agabka dibada laga keenay iyo wax soosaarka daafaha caalamka. Sida ugu fiican ee wax looga barto suuqyada maxaliga ah iyo maqaayadaha waa "in dadku kuu sheegaan" marka la hadal dadka deegaankaaga, goobta cibaadada oo ka raadi oonlaynka.

- Dhammaan suuqyada adeegyada e waawayn ayaa iibiya cuntooyin badan oo laga isticmaalo aduunka. Qaar kamid ah suuqyada ayaa leh 1-2 layn oo lagu iibsho cuntooyinka caalamiga ah keliya.
- Si aad u hesho liiska dukaannada iibsha cuntooyinka aduunka kale, booqo [yellowpages.ca](http://yellowpages.ca)
- Waxaa jira aabab kugu hagaaya dukaannada adeegyada cuntada qoomiyadaha kaladuwan iyo maqaayadaha. Si aad u hesho ababkaan, booqo kaydka ababka ee ku haboon ayadoo u xiran aalada aad isticmaalaysa.
- Webseediyada fikiradaha ka baxsha maqaayadaha ayaa sidoo kale baxsha liiska uruursan ee nooca cuntada, ayna ku jiraan kuwa dadka aan hilibka cunin.
- Suuqyada beereleeyda ayaa u sahlaaya adeeg bixiyaasha inay iibshaan wax soo saarka iyo alaabta kale sanadka oo dhan. Suuqyadaas ayaa ku yaala dhismeyaasha, goobaha baakinka ama baakinnada maalmaha gaarka ah. Waxaad suuq ku yaala deegaankaaga ka eegi kartaa [farmersmarketsontario.com](http://farmersmarketsontario.com)

1-855-626-0002  
<https://orientationontario.ca>

Funded by / Financé par

- Cuntooyinka Xiliyada gaarka ah - si aad wax badan uga ogaato xiliga miraha iyo khudaartu ay soo go'aan, booqo Ontario Foodland oo aad ka helayso [ontario.ca/foodland](http://ontario.ca/foodland)

## XAFLADAHA IYO XARUMAHA DHAQANKA

Waxaa jira madxafyo, tiyaataro iyo xarumaha dhaqanka oo ku yaala deegaannada balaaran iyo xaafadaha yaryar ee gobalka oo dhan.

- Madxafyada: booqo [museumsontario.org](http://museumsontario.org) si aad u hesho liiska madxafyada.
- Filinka: ka baar oonleenka ama wargeyska maxaliga ah bandhigyada filinka ee deegaankaaga.
- Tiyaatarka: Booqo Theatre Ontario [theatreontario.org](http://theatreontario.org) si aad u hesho liiska tiyaatarada xaafadaada.
- Farshaxanka: si aad u hesho liiska xarumaha/kaydadka farshaxanka, oonleenka ka baari mid ku taala deegaankaaga.
- Muusiga iyo Dheesha: Ka raadi oonleenka ama wargeyska deegaankaaga munaasabada maxaliga ah.
- Maalinta Canada: dabaaldeggyada ayaa lagu qabtaa dhammaan Ontario Luuliyi 1.
- Munaasabadaha dadka Asaliyiinta ah: si aad u aragto liiska munaasabadaha Maalinta Qaran ee dadka Asaliyiinta ah, booqo webseedka Wasaarada Arimaha Dadka Asaliyiinta ah iyo Waqooyiga ee Canada [aadnc-aandc.gc.ca](http://aadnc-aandc.gc.ca)
- Dabaaldeggyada Francophone: si aad u hesho liiska dabaaldeggyada iyo munaasabadaha kale, booqo [voyagesontario.com](http://voyagesontario.com)

Si aad u hesho munaasabado kale oo badan, booqo [festivalsandeventsOntario.ca](http://festivalsandeventsOntario.ca) ama [summerfunguide.ca](http://summerfunguide.ca)

Si aad wax uga barato dabaaldeggyada iyo munaasabadaha dhaqanka ee ka socda deegaankaaga, booqo [ontariotravel.net/en/home](http://ontariotravel.net/en/home)

Dabaaldeggyada dhaqanka iyo dhaqannada badan oo ay ku jiraan fanka, filinka, cuntada iyo muusiga ayaa la qabtaa sanadka oo dhan. Xarumaha bulshada iyo maktabadaha ayaa badanaa xog ka haya xafladaha maxaliga ah. Warbaahinta maxaliga ah iyo kuwa dhaqanka ayaa xayeysiya munaasabadaha dhaqanka. Qaar kamid ah tusaaleyaasha bandhigyada waxaa kamid ah:

Caribana, dabaaldeggyada dhaqannada Caribeanka [caribanatoronto.com](http://caribanatoronto.com)

DesiFest, dabaaldeggyada muusiga Koonfurta Eeshiya [desifest.ca](http://desifest.ca)

Dabaaldeggyada Caalamiga ah ee Tartanka Dragon Boat oo lagu qabto Toronto [dragonboats.com](http://dragonboats.com)

Winterlude oo lagu qabto Ottawa, [canada.pch.gc.ca/eng/1416239267950](http://canada.pch.gc.ca/eng/1416239267950)

Oktoberfest oo lagu qabto Kitchener, [oktoberfest.ca](http://oktoberfest.ca)

Ontario Pride, [ontariotravel.net/en/play/lgbt/pride](http://ontariotravel.net/en/play/lgbt/pride)

Dabaaldeggyada Filinka iyo Muusiga Afrikaanka ee Toronto, [torontoafricanfilmfestival.com](http://torontoafricanfilmfestival.com)

Fiesta London Mexican Festival, oo lagu qabto London [fiestalonion.ca](http://fiestalonion.ca)

Dabaaldeggyada Fanka Laatiinka oo lagu qabto Toronto, [ontariolatinartsfestival.ca](http://ontariolatinartsfestival.ca)

Dabaaldeggyada Dhaqanka Xaafadaha Caalamka ee Brantford, [brantfordvillages.ca](http://brantfordvillages.ca)

Dabaaldeggyada Belleville Waterfront iyo Qoomiyada, [bellevillewaterfrontfestival.com](http://bellevillewaterfrontfestival.com)

## RUUXIYADA

Ontario waa bulsho cilmaani ah, laakiin dadka dhammaan diimaha ayaa xor u ah inay caabudaan cida ay doonaan. Waxaad ka helayaa kaniisadaha, masaajida, macbadyada yuhuuda iyo xarumaha sanamyada kaydka maxaliga ah ee taleefannada ama waxaad ka baari kartaa oonlaynka.

- Masaajida iyo Xarumaha Islaamka [muslimcanada.org](http://muslimcanada.org)
- Macbadyada Yuhuuda - [cjcc.ca](http://cjcc.ca) ama [findlink.at/syndir](http://findlink.at/syndir)
- Xarumaha asnaamta Hindida - [shaivam.org](http://shaivam.org)
- Kaniisadaha Sikh - [worldgurudwara.com](http://worldgurudwara.com) ama [findlink.at/stemples](http://findlink.at/stemples)
- Xarumaha Buudistaha - [buddhist.ca](http://buddhist.ca) ama [findlink.at/bcentr](http://findlink.at/bcentr)
- Kaniisadaha Anglican - [anglican.ca](http://anglican.ca)
- Kaniisadaha Kaatooliga Romanka - [catholiclinks.org](http://catholiclinks.org)
- United Church of Canada - [locator.united-church.ca](http://locator.united-church.ca)
- Baptist Churches ee Canada - [baptist.ca](http://baptist.ca)

